

Xeerka Guudmiyaha Jamhuuriyadda lamba. 133 ee 26 Maay 1966

Oggolanshada Heshiisyada maalgelinta wadareed ee dhismahda jidka isku xira Afgooye iyo Baydhaba iyo dhismaha Waxda Jidadka

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Kadib markii la arkay qod. 75 ee Dastuurka;

Kadib markii la arkay heshiiska “Is af-garadka ah” ee lagu gunaanaday Bruxelles 23 Nofeember 1964 oo u dhexeyey Jamhuuriyadda Somaliya iyo FED ee Midowga Suuqa Yurub iyo “International Development Association’ iyo heshiisyada “United Nations Special Fund” si wadajir ah loo maal geliyo mashruuca guud ee dhismaha jidka Afgooye- Baydhaba iyo dhismaha Waaxda Jidadka;

Kadib markii la garawsaday in Dowladda Somaliyeed ay ka faa’ideysato malgashigaan oo logu aqbalay heshiiyada ka dhexeeya Dowladda Somaliya, Sanduqa Yurub ee HORumarinta Suuqa Yurub, International Development Fund, Special Fund ee Qaramada Midoobay iyo Bangiga Caalamiga ee dhismaha iyo horumarintala habeeyo ganacsiga mooska ee dowladaha Bariga Dhexe si loo ilaaliyo misaanayada bixinta lacagaha iyo horumarinta iyo wada shaqeynta ganacsiga ee dowladaha aan heshiis lala yahay;

Kadib markii la dhegeysta soo jeedinta Golaha Wasiirka;

Kadib markii la tixgeliyey aragtida Wasiirka Maaliyadda, midka Qorsheynta iyo Wasiirka Howlaha Guud.

WAXAA LA SOO SAARAY

Qod. 1

Laga bilaabo muddada la fulin doono heshiisyadada sare ku xusan waxaa la farayaa in loo hoggansanaado:

HESHIISKA AMAAHDA HORUMARINTA - oo lagu gaaray Washington 29 Maarso 1965 uuna dhexeya Dowladda iyio International Development Association

HESHIISKA MAALGELINTA - oo lagu gaaray Bruxelles 23 Maarso 1965 oo u dhexeya Jamhuuriyada Somaliya Santuuqa Yurub ee Horumarinta ee Suuqa Dhaqaalaha ee Yurub;

HESHIISKA IDAARIGA AH - ee lagu gaaray Washington 29 Maarso 1965 ee u dhexeyaa Dowladda Somaliya, Sanduuqa Yurub ee Horumarinta iyo International Development Association;

“HIGHWAY DEVELOPMENT PROGRAMME PLAN OF OPERATION” : oo lagu gaaray Washington 4 Oktober 1965 uuna dhexeeya Dowladda Somaliya, Special UN Fund, Bangiga Caalamiga ee dhismaha iyo horumarinta oo khuseeya dhismaha jidka Afgooye-Baydhaba iyo dhismaha Waaxda Dhismaha.

Qod. 2

Affartaan heshiisyo oo sare ku xusan waxa qeyb ka yihiin Dekreetadaan oo lagu keydin doono Keydka Rasmiga ee Shuurucda iyo Xeerarka Jamhuuriyadda laguna soo daabici doono Faafinta Rasmiga.

Waxaa la faraya cid kasto in ay u hoggansanaato sharci una hoggamiso cid kasta.

Muqdisho, 26 Maayo 1966.

Aden Abdulle Osman

Rai'sul Wasaaraha

Abdirizak Haji Hussein

Wasiirka Maaliyadda

Ali Omar Scego

Wasiirka Howlaha Guud

Scek Abdulle Mohamud

Wasiirka Qorsheynta Qaranka

Mohamed Ismail Abdi